Waxay waaxdaan eegtaa qiyaastii 200 bukaan ah maalin kasto waxayna furan tahay 24 saacadood maalintii, 365 maalimood sanadkii. Waxay wax ka qabataa daawaynta bad-badbaadinta iyo taxadirka caafimaad ee degdegga u ah kuwa aad u xanuunsan ama dhaawaca ah.

Caruurta

■ Waxaa jiro aag sugitaanka ee gaar u ah caruurta, oo furan 10:00 – 22:00,

7maalin toddobaadkii. Waa inay waaliddiinta/xanaaneeyayaasha ay kor joogaan caruurtooda dhammaan waqti kasto.

Ma ilaalin karno caruurta ee dadka qaangaarka ah. Fadlan qabanqaabiya sidii guriga si degdeg ah lagu gayn lahaa intii suurto gal ah.

Waxyaabaha fududeeyo naas-nuujinta

■ Waxaa kuu sheegi karto kal-kaaliyadda waxaa ku saabsan waxyaabaha fududeeyo nas-nuujinta.

Ma isbitaalka deegaankaadaa?

■ Haddii kani ahayn isbitaalka deegaankaada way xadidan tahay la socodka xanaanaynta ee aan bixino.

Saaxibo iyo xanaaneeyayaal

■ Waan ku faraxsan nahay inay saaxibada ama xanaaneeyayaasha ay la joogaan bukaanlayda, laakin waxaan mar mar waydiisan karnaa inay ka baxaan qolka.

Cabitaano qaboob ah

■ Waxaa ku yaalaan aagga sugitaanka mashiinadaha cabitaanka, waxayna hawlwadeenada kuu tilmaami karaan halka uu ku yaal maqaayadda haddii aad gaajaysan tahay. Waydii kal-kaaliyadda ka hor cuntada ama cabidda, hana isticmaalin wax aalkol ah. Ma laga oggolo sigaar cabidda meel kasto ee ka tirsan isbitaalka

Musqulaha

■ Haddii aad u baahatid tilmaamayaasha musqulaha waydii kal-kaaliyadda

Adeegyadeena gaar ah

■ Waxay bukaanlayda qaarkood arkayaan kal-kaaliyadda waxqabadka degdegga. Waxay kuwaani yahiin kal-kaaliyayaal si gaar ah u tabobaran kuna takhasusay inay daaweeyaan cudurada/dhaawacyada yar-yar. Sidaasi darted ma u baahnid inaad aragtid takhtar & waqti horena ayaad ku tegi kartaa guriga

■ Waxaan qabanaa waxii uu Takhtarka Guud (GP) inoogu soo gudbiyo inay dib u eegaan takhaatiirta takhasuska u leh, & inaan ka qabano daba-gal rugaha A& E ee bukaanlayda & rug maalimeedka. Bukaanlayda oo inoo soo gudbiyay Takhtarka Guud waxaa eegaayo takhtar takhasus u leh sida ugu dhaqsi badan ee lagu heli karo.

Haddii aad qabtid wax su'aalo ah

fadlan la soo hadal kal-kaaliyaadda, taasi oo kuu sii gudbin karto kal-kaaliyadda hawsha leh

infermieren e turnit, e cila mund t'ju referojë tek infermierja e caktuar.

Royal Free Hampstead NHS
NHS Trust

ACCIDENT & EMERGENCY DEPARTMENT (A&E) (Waaxda Shilka & Degdegga)

Khadka tooska ah: 020 7830 2110

Waxuu bug-yarahaan kuu micnaynayaa sida wax qeybtaan loo maareeyo iyo sida bukaanlayda loo daaweeyo

Magaca:

Mudnaantaada waa:

Qiyaasta waqtiga aad sugeydo:
Waxaan garan karnaa inaad ka welwelsananaan kartid waxa ku saabsan xaaladdaada, ama xaaladda qofka aad la socotid. Waxaan isku dayeenaa inaan fidino waqtiga sugitaanka, laakin waxaa dhici karto in la awoodin waqtiyada masquulka la yahay ama haddii waxyaabo dedeg deg ah ee cusub yimaadaan.

Marka imaatanka, waxaad siisay faahfaahinadaada hawlwadeenada soo dhowaynta. Waxaa markaa ku qiimaysay kal-kaaliyad takhasususs leh, iyada oo isticmaalayso habka NHS ee lagu kala siiyo bukaanlayda kala mudnaanshaha

Waxay kal-kaaliyadda kuu coodsan kartaa in lagu saaro raajo(x-ray) ayna ku siiso hal sheey oo kaa joojiyo xanuunka.

Bukaanleyda waxaa ka dib lagu arkaayaa sida ay baahidooda tahay, ma loo fiirinaayo waqtigooda imaanshaha

Haddii aad dareensan tahay in xaaladdaada soo xumaatay, fadlan la soo hadal kal-kaaliyadda

Haddii aad dareensan tahay in xaaladdaada soo xumaatay, fadlan la soo hadal kal-kaaliyadda

MUDNAANTA 1(CASAAN)

Bukaanlayda xaaladda noloshooda ay halista ku jirto oo ah in la arko ama way dhimanayaan. Waxaan u arkaynaa bukaanlaydaan si degdeg ah.

MUDNAANTA 2(ORANJADA)

Bukaanlayda aad ayay u jiran yahiin, laakin noloshooda ku ma jirto halis degdeg ah (tusaale gubnaansho culus, fiiro xanuun ama neefsasho la'aan culus)

MUDNAANTA 3 (HUDUUR)

Bukaanlayda qabto dhibaatooyin aad u xun laakin deggan si nabadgelyo lehna ku sugi karaan (tusaale, kuwa ka xanuunsan qaynta dambe, feero ja-jaban cudurka neefta)

MUDNAANTA 4(CAGAAR)

Bukaanlayda aan ugu jirin halis degdeg ah jiradooda ama dhaawacooda (tusaale, kuwa qabo jabka yar, meel ka jeexantay ama murgacasho, muruq xanuun).

MUDNAANTA 5(BULUUG)

Bukaanlayda qabto cuduro oo xilli dheer socdey.Gudaha dhammaan kategooriyayaasha,waxaa mar kowaa la arkayaa arrimaha aad u culus.

Waxaa laga yaaba inuu jiri karo waqti sugitaan inta la diyaarinaayo waxa ka soo baxo barista ka hor iinta la go'aaminin daawaynta Waxaan maamulnaa dhoowr rugyo oo ah A&E.
Bukaanlayda lagu arkaayo meelahaan ma waxyeelaynayaan kuwa kale ee mudnaanta ama waqtiga sugitaanka.
Bukaanlayda lagu keeno ambulansada waxaa la siinayaa ilsa mudnaanta la siiyo kuwa ku imaanaayo waaxda siyaabo kale değerlendirmesine tabi tutulurlar.

Waxay ujeeddadayna tahay inaan ku fiirino, ku daawayno, ku dhigno, kaa saarno ama kuu gudbino sida ugu suurto gashan, isla markaas iyada oo la siinaayo bukaanlayda daawayn xirfadaysan.
Fadlan ogaaw:

- Inaan u dul-qaadanayn af lagaaddo iyo dagaal lid ku ah hawlwadeenadeena

- Ma u qaban qaabin karno bukaan-socod ballan dibedda ah haddii u deg-deg ahayn.
– waa inaad ku soo samaysataa adiga oo soo maraayo Takhtarka Guud

- Trust-iga ma oggolaan karo mas'uuliyadda waxii hanti ah maaddada qaaliga ah
Waad ku mahadsan tahay iskaashigaada

© A&E Department/
Patient Information Programme 2003

www.royalfree.nhs.uk